Siistemka La Socodsiinta Argagixisada Qaranka

# Wargeys

www.dhs.gov/advisories **TAARIIKHDA LA SOO SAARAY: Isniin, Maajo 15, 2017**

## Soo Koobidda Handadaadda Argagixisada Ku Barbaartay Waddanka

Laga bilaabo 2015, Waaxda Sugidda Amaanka Waddanka (Department of Homeland Security) (DHS) waxay adeegsatay wargeyskaan si ay u muujiso handadaadda sii socoto ee argagixisada ku barbaartay waddanka, kuwaasoo inta badan internetka ka hela dhiirigelinta dagaalka ururada argagixisada shisheeyaha. Mareykanka wuxuu ku jiraa dagaalka jiilasha ee lagula jiro argagixisada, raadisa in ay weeraraan dadka Mareykanka, waddankena iyo habka noloshena. Dadweyne xogogaal ah, soo jeeda, iyo ka-qeybgala waa mid ka mid ah hantidena ugu waaweyn si loo aqoonsado argagixisada suurtogalka ah ee ku barbaartay waddanka, loogana hortago weerarada.

## Muddada

**Soo Saarka:** Maajo 15, 2017
**Dhicidda:** Nofembar 15, 2017

## Tafaasiisha Dheeraadka ah

- Waxaa na soo food saaray mid ka mid ah daruufaha ugu culus handadaadda argagixisada laga soo bilaabo weerarkii 9/11, ururada argagaxisada shisheeya waxay wadaan in ay ka fa'iideystaan Internetka si ay u dhiirigeliyaan, u siiyaan awood, ama faraan shakhsiyaadka horay u joogo halkaan waddanka in ay geystaan falalka argagixisada.
- Kuwa lagu tuhunsan yahay argagixisada ku barbaartay waddanka waxay in badan isku haleyaan farsamada, sida brograamyada warbaahinta bulshada ee dahsoon dhamaadka-ilaa-dhamaadka, si aan loo ogaanin. Intaas kaddib, kooxaha argagixisada waxay ku riixaan kuwa ay qortaan in ay adeegsadaan qalab sahlan si ay u bartilmaameedsadan goobaha iyo munaasabadaha dadweynaha. Qaar ka mid ah xiiladaha weerarka waxaa ka mid ah isticmaalka baabuurta lagu dhufto meelaha, hubabka yaryar, biraha fiiqan ama middiyo, iyo waxyaabaha qarxo ee lagu sameeyo guriga, iyo falal kale sida dadka oo la qafaasho.
- Marka Mareykanka ku dadaalo carqaladeynta iyo jebinta kooxaha argagixisada dibadda, waxaa sii socon doonto in aan la kullano xaalad handadaad oo wijiyo badan.
- Gaar ahaan, guulasha sii socda ee loogu talogalay in lagu carqaladeeyo iyo lagu jebiyo kooxaha argagixisada dibadda, taasii waxay argagixisada ku barbaartay waddanka kuna sugan Mareykanka in ay fulliyaan falalka dagaalka.
- Intaasi waxaa dheeraad ku ah in dagaalyaanka argagixisada shisheeyaha, ee soo qaatay tababar iyo soo tijaabiyay argagixisada dagaalka, waxay u badan yahiin in ay ka cararaan goobaha argagixisada kantaroosho, rabitaankoodana yahay in ay weerar ka fulliyaan meelo kale, sida Mareykanka. Qaar ka mid ah dadkaan waxay ahaan karaan muwaadiniin Mareykan ah ama muwaadiniin ka soo jeeda waddamo kale oo iskudaya in ay u soo safraan Mareykanka iyaga oo haysta fiiso, laga soo qaato waddamada laga dhaafay fiisada, ujeedadoodana tahay in ay weeraraan waddanka ama ku dhiirigeliyaan dad kale oo ku sugan xuduudena in ay geystaan weerar.

## Dadaalka Ka Hortagga Argagixisada Waddanka Mareykanka

- DHS iyo FBI waxay sii wadaan in ay hoggaamin siiyaan iskaashiga gobolka, deegaanka, qabaailka iyo dhulka lana xariira daruufaha handadaadda iminka jira. DHS waxay kaloo iskaashi la samaysaa ganacsiga gaarka loo leeyahay

si ay u bixiyaan qiimeynta halista iyo si ay isugu duwaan talaabadaha sugidda ammaanka lala leeyahay milkiileyaasha ganacsiga iyo hawl wadeenada. Dadweynaha waxay kor ka arki karaan hawalaha hirgelinta sharciga iyo sugidda ammaanka ka wadaan goobaha dadweynaha iyo munaasabadaha.

- DHS waxay ku hawlan tahay in ay qaado talaabooyin wax looga qabto handadaadda dagaalyaanka argagixisada shisheeyaha ee u safray ama iskudayay in ay u soo safraan Mareykanka, kana mid ah sida sokke ee loola shaqeeyo iskaashatada FBI iyo Sir Doonka, si loo aqoonsado shakhsiyaadka Mareykanka ee ka tagay waddanka si ay ugu biiraan kooxaha argagixisada, iyo hirgelinta baaritaan la xoojiyay iyo baaritaan tafatiran si loo ogaado musaafiriinta xariir suurtogalka ah la leh argagixisada.
- Marka la sii balaariyo, waxaan xil iska saarnay in aan ka hortagno dagaalka iyo handadaadda loola jeedo in lagu cabsi geliyo ama lagu qasbo dadyowga qaar, taasoo ku saleysan diintooda, isirkooda, ama aqoonsigooda, kaddibna raadsano cadaaladda ka soo horjeedo dadka fuliyo falalka noocaas ah.

## Noocyada Ogeysiisyada

### Wargeyska

Waxay sharaxdaa wararka iminka jira ama sasaanka guud ee ku saabsan handadaadda argagixisada.

### Digniinta Sare

Waxay ka digtaa handadaadda argagixisada lagu kalsoonaan karo kana soo horjeedo Mareykanka.

### Digniinta Nala Soo Daristay

Waxay ka digtaa handadaadda argagixisada nala soo daristay, cayiman, oo lagu kalsoonaan karo kana soo horjeedo Mareykanka.

## Sida aad Kaalmo uga Geysan Kartid

- Waxaad hawlaha la tuhmi karo u soo sheegtaa hirgelinta sharciga deegaanka ee sida ugu fiican looga heli karo tafaasiisha ku saabsan tilmaameyaasha argagixisada.
- Hawlaha la tuhmo ama macluumaadka ku saabsan handadaadda waxaa kaloo la gaarsiin karaa Fusion Centers iyo FBI's Field Offices - qeybna ka ah Qorshaha Wargelinta Hawlaha La Tuhunsan Yahay Qaranka (Nationwide Suspicious Activity Reporting Initiative). DHS iyo FBI waxay si gaar ah u daneyaan safarka dibadda aan caadiga ahayn ee lagu tago goobaha lagu yaqaan argagixisada.
- Baro sida loo aqoonsado calaamadaha qorsheynta ka horeeyo hawlgalka ee la xariira argagixisada ama hawlaha dambiyada kale.

## Isu Diyaari

- Isu diyaari sugidda ammaanka iyo horay u qorsheyso. Ku talogal dib u dhac iyo xannibaadyo ku yimaada waxyaabaha laga helo agagaarka goobaha dadka ku badan yahay iyo munaasabadaha.
- Mas'uul ka noqo ammaankaada shakhsiga. Madaxa ku haay meelaha sida dedegga ah looga baxo iyo shaqaalaha ammaanka. Mar kasta qaado tafaasiisha xariirka degdegga iyo macluumaadka baahida gaarka.

- Milkiileyaasha ganacsiga waxaa lagu dhiirigelinaa in ay La Xariiraan, Qorsheyaan, Tababaraan, iyo soo Sheegaan si ay u diyaariyaan ganacsatada iyo shaqaalaha. Qalabka Sugidda Ammaanka/ilaha waxaa laga heli karaa Hometown Security Campaign ee DHS.
- Si aad u heshid macluumaad badan, booqo Ready.

## Xogogaal Noqo

- Dawladda Mareykanka waxay bixin doontaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan handadaad kasta oo soo if baxda isla marka la helo macluumaad dheeraad ah. Dadweynaha waxaa lagu dhiiri geliynaa in ay dhageystaan ciidanka hirgelinta sharciga deegaanka iyo saraakiisha ammaanka dadweynaha.
- Waxaan ku dhiirigelineynaa Mareykanka in ay sii wadaan safarka, tagaan munaasabadaha dadweynaha, iyo in ay si madax banaan ula xariiraan dadka kale balse adkeyaan feejignaanta iyo la socoshada agagaarka.
- Waaxda Arrimaha Dibadda (Department of State) waxay soo saartaa la socodsiinta iyo digniinta safarada caalamka.

**Haddii Aad Aragtid Shay, Sheeg Waxa Aad Aragtay™**
**Waxaad hawlaha la tuhmi karo u sheegtaa hirgelinta sharciga deegaanka ama wac 911.**

Siistemka La Socodsiinta Argagixisada Qaranka (National Terrorism Advisory System) waxay Mareykanka siisaa macluumaad ku saabsan arrimaha sugidda ammaanka waddanka iyo handadaadda. Waxaa qeybiya Waaxda Sugidda Ammaanka Waddanka (Department of Homeland Security). Waxaa macluumaad badan laga helaa: www.dhs.gov/advisories. Si wararkii ugu dambeyay laguugu soo diro telefoonka gacanta: www.twitter.com/dhsgov.

*Haddii Aad Aragtid Shay, Sheeg Waxa Aad Aragtay™ la isticmaalay kaddib marka ruqsad laga soo qaatay Madaxda Gaadiidka Magaalada NY (NY Metropolitan Transportation Authority).*